

DEVELOPMENTAL DISABILITIES ADMINISTRATION (DDA)  
**Caddeynta Adeegyada Guriga-ka-Baxsan**  
Out-of-Home Services Acknowledgement

Caddeyntan waxay muujinaysaa xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha macmiilka, waalidka ama mas'uulka sharciga ah, iyo adeeg-bixiyaha La aqoonsan yahay ama shatilahaha ah inta uu cunug qaadanayo adeegyada Guriga-ka-Baxsan.

|  |                      |                         |
|--|----------------------|-------------------------|
| MAGACA CUNUGGA (KOOWAAD, DHEXE, DAMBE) | TAARIKHDA DHALASHADA | LAMBARKA AQOONSIGA ADSA |
|--|----------------------|-------------------------|

CINWAANKA DEGAANKA

**Caddeynta Waalidka / Mas'uulka Sharciga ah**

Markaan dokumentigan saxiixo, aniga oo ah, \_\_\_\_\_, waalidka / mas'uulka sharciga ah ee

\_\_\_\_\_ waxaan caddeynayaa/qirayaa:

1. DSHS/DDA ayaa bixinaya adeeyo loo marayo Adeegyada Ka-dhaafiddan ee Guriga iyo Bulshada Ku Saleysan ee Medicaid ama Waddooyinka loo maro deqda Nololaha Bulshada.
2. Adeegyada loo bixiyay si waafaqsan qorshaha adeegga shakhsiga-xuddunta u yahay waa ikhtiyaari oo adeegyada waxaa waqti kasta joojin kara dhinacyada midkood.
  - a. Waalidka ama mas'uulka sharciga ah ayaa adeegyada joojin kara waqti kasta, iyadoo aanan la eegayn sababta. Ogeysiis qoraal ah oo 30-maalmood ah ayaa la codsadey laakiinse looma baahna.
  - b. Haddii adeeg-bixiye la aqoonsan yahay ama shatilahaha ah uu joojiyo adeegyada guriga-ka-baxsan ee macmiilka, adeeg-bixiyaha waa in uu:
    - i. Qoraal ku wargeliyaa waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee macmiilka, DDA, iyo iskuulka macmiilka ugu yaraan 30 maalmood joojinta ka hor;
    - ii. Bixi mid ka mid ah sababahan joojinta ee soo socda:
      1. Adeeg-bixiyaha kama soo bixi karo baahiyada macmiilka;
      2. Bedqabka macmiilka ama bedqabka dadka kale ee guriga ama xarunta ayaa halis ku jira; ama
      3. Adeeg-bixiyaha ayaa joojiyay in uu hawlgalo; iyo
    - iii. Ka qaybgalay diyaarinta qorshe kala-guur.
  - c. Haddii macmiilka uu joojiyo adeegyada guriga-ka-baxsan ee macmiilka, DDA waxay qiimeyn doontaa caafimaadka macmiilka iyo baahiyada daryeel waxayna oggolaan doontaa adeegyada dhaca gudaha baaxadda ka-dhaafidda HCBS ama RCL.
3. Isqoritaanka adeegyada guriga ka baxsan ma saameynayo xuquuqaheyga sharciga iyo mas'uuliyadaha waalid ama mas'uul sharci ahaan;
4. Cunugeyga iminka kuma jiro gacanta Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska (DCYF) iyadoo la raacayo RCW 13-34-050 ama 26.44.050, lagu meeleeeyay daryeelka hoyga waafaqsan xeerka RCW 13-34-060, ama lagu meeleeeyay daryeelka korsashada ee waafaqsan xeerka RCW 13.34.130;
5. Waxaan sii lahaanayaa haynta sharciga ah ee meelaynta cunugeyga iyo daryeelka, oo uu ku jiro:
  - a. Oggolaanshaha daryeelka caafimaadka ee cunugeyga; iyo
  - b. Sameynta dhammaan go'amada sharciga ah ee cunugeyga oo ay ku jiraan kuwa ku wareegsan adeegyada guud ee waxbarashada iyo kuwaga ahaan.
6. Waxaan sharci ahaan mas'uul ka sii ahaan doonaa:
  - a. Daryeelidda cunugeyga;
  - b. Cunugeyga haddii adeegyada guriga-ka-baxsan la carqaladeeyo; iyo
  - c. Kharashka daryeelka cunugeyga, oo ay ku jiraan kharashaadyada aasaasiga ah iyo kuwa cuntada iyo jifka ee aannu caymin caymiska gaarka loo leeyahay, Medicare, qorshaha dowladda ee Medicaid, ama ilaha kale ee maaliyadda.
7. Cunugeyga wuxuu leeyahay xuquuqahan gaarka ah ee soo socda sida looga baahan yahay xeerka goobaha HCBS kaasoo **wax looga beddeli karo hadba sidii loo baahdo** oo ah si ku saleysan kiisaska halka koritaan ahaan ay habboon tahay: [42 C.F.R. Qaybta 441.530](#) iyo [Cutubka 71A.26 RCW](#).
  - a. Shakhsi kasta wuxuu asturnaan ku haystaa qaybtiisa hurada ama fadhiga:
    - i. Qolalka jifka waxay leeyihiin albaabo ay soo xiran karaan shakhsiyaadka, iyadoo hawlwadeennad ku habboon oo keliya ay haystaan furayaasha ama koodhka.
    - ii. Shakhsiyaadka wadaagaya guriga waxay dooran karaan dadka ay isku qolka noqon karaan ee goobta ku sugan.
    - iii. Shakhsiyaadka waxay xor u yihiin in ay alaab dhigtaan oo ay sharaxdaan qaybaha jifka iyo fadhiga haddiiba sharraxaaddu aysan burbur u geysaneyn qaybta. Xaaladda goobaha guud ee fadhiga la wadaago, shakhsiyaadka waxaa la filayaa in ay wada-shaqeyn la yeeshaan dadka ay isku guriga yihiin. Hay'adda adeeg-bixiyaha ah waxaa ay hannaankan u fududayn doontaa sida loo baahan yahay.
  - b. Shakhsiyaadka waa in ay awoodaan in ay:
    - i. Xakameeyaan jadwalladooda iyo hawlahooda;
    - ii. Cunto helaan waqtiyada oo dhan;
    - iii. In ay dooran karaan dadka soo booqanaya waqti kasta; iyo
    - iv. In geli karaan qolkooda iyo dhammaan goobaha la wadaago ee gurigooda.

**Waalidka / mas'uulka sharciga ah wuxuu oggol yahay:**

Waxaan oggolahay in aan fuliyo mas'uuliyadahan soo socdo inta cunugeyga uu qaadanayo adeegyada guriga ka baxsan:

1. Waa in maareeyaha kiiskeyga DDA ku wargeliyaa cinwaankeyga hadda iyo lambarkeyga telefoonka oo waa in aan ku wargeliyaa maareeyaheya kiiska toddoba maalmood gudahooda haddii macluumaadka xiriirkeyga uu isbeddelo.
2. Waa in aan joogteeyaa xiriirka toddobaadlaha ah ee aan la yeesho cunugeyga waanna in aan si firfircoon uga qaybgalaa qorsheynta daryeelka cunugeyga.
3. Waa in aan ka qaybgalaa horumarinta iyo qiimeynta sannadlaha ah iyo tan joogtada ah ee qorshaha waxbarashada gaarka ah ee cunugeyga oo waa in aan joogteeyaa xiriir joogto ah oo lala yeesho bixiyaha la aqoonsan yahay ama shatiga haysa iyo wakiillada iskuulka.
4. Waa in aan isuduwa dhammaan dheefaha caafimaadka hab-dhaqanka ama jirka ee la heli karo iyadoo loo marayo caymiska gaarka loo leeyahay, Medicare, ama qorshaha dowladda ee Medicaid waanna in aan kala hadlaa oo aan isku-dubaridnaa dheefahan bixiyaha shatiga haysta ama la aqoonsan yahay.
5. Waa in aan codsadaa dakhliga iyo dheefaha uu heli karo cunugeyga waanna in aan bixiyaa macluumaadka loo baahan yahay si aad uga dhigo kuwo firfircoon.
6. Waa in aan ka qaybgalaa:
  - a) Diyaarinta iyo hirgelinta qorshaha wada-shaqeynta qoyska iyo cunugga;
  - b) Kulannada kooxda; iyo
  - c) Qiimeynta sannadlaha ah ee DDA, oo ay ku jirto qorshaha adeegga uu qofku xuddunta u yahay.
7. Waxaan mas'uul ka ahay xaqiijinta maareynta maaliyadaha cunugeyga oo ay ku jiraan damaannada bulshada ama dakhliga damaananda ee dheeriga ah iyo sidoo kale u hoggaamsamida mas'uuliyadda macmiilka iyo kharashaadka aasaasiga ah. Waxaan fahansanahay in aan isu dooran karo in aan nafteyda sameeyo, ama waxaan sameyn karaa lacag-qaade wakiil ah oo sidaa sameeyo isaga oo ka wakiil ah cunugga.
8. Waa in aan hubiyaa lacag-bixinta mas'uuliyadda macmiilka ama kharashaadyada aasaasiga ah. Lacag-bixin la'aanta waxay burburin kartaa adeegyada cunugeyga ee adeeg-bixiyaha.

Waa in aan DDA siiyaa nuqulka qorshaha waalidka ee ay maxkamadda amartey ee la wadaago iyo/ama wareegtada furiinka marka la adeegsan karo.

|  |            |
|--|------------|
| SAXIIXA MACMIILKA (HADDII UU KA WEYN YAHAY 18) | TAARIIKHDA |
| SAXIIXA WAALIDKA / MAS'UULKA SHARCIGA AH       | TAARIIKHDA |
| SAXIIXA WAALIDKA / MAS'UULKA SHARCIGA AH       | TAARIIKHDA |

ANIGA OO AH, \_\_\_\_\_, (KU QOR MAGACA WAALIDKA), waxaan caddaynayaa anigoo hoostagaya ciqaabta dhaar beeneedka in waxyaabahan soo-socda ay yihiin kuwo run ah oo sax ah, in aan leeyahay haynta sharciga ah ee cunuga, ama cunuga wuxuu iila degan yahay waqtiga badankiisa sida lagu qeexay qorshaha barbaarineed, ama waxaan leeyahay mas'uuliyadda iyada oo la raacayo qorshaha barbaarineed si loo oggolaado heshiiskan.

\_\_\_\_\_ markii ay taariikhdu ahayd \_\_\_\_\_ waqtiga \_\_\_\_\_  
 SAXIIXA WAALIDKA / WAKIILKA SHARCIGA AH TAARIIKHDA GOOBTA (MAGAALO, GOBOL)

**Bixi Caddeynta**

|                                    |                       |                         |
|------------------------------------|-----------------------|-------------------------|
| MAGACA CUNUGA (HORE, DHEXE, DAMBE) | TAARIIKHDA DHALASHADA | LAMBARKA AQOONSIGA ADSA |
| CINWAANKA DEGAANKA:                | MAGACA XIRIIRKA       | LAMBARKA TELEFOONKA     |

Markaan dokumentigan saxiixno, annaga, \_\_\_\_\_, **adeeg-bixiye la aqoonsan yahay ama shatiile ahaan waxaan caddeynayaa oo aan oggolahay kuwan soo socda:**

1. DSHS/DDA ayaa bixinaya adeegyo loo marayo Adeegyada Ka-dhaafiddan ee Guriga iyo Bulshada Ku Saleysan ee Medicaid ama Waddooyinka loo maro Nolasha Bulshada.
2. Adeegyada loo bixiyay si waafaqsan qorshaha adeegga shakhsiga-xuddunta u yahay waa ikhtiyaari oo adeegyada waxaa waqti kasta joojin kara dhinacyada midkood.
  - a. Waalidka ama mas'uulka sharciga ah ayaa adeegyada joojin kara waqti kasta, iyadoo aanan la eegayn sababta. Ogeysiis qoraal ah oo 30-maalmood ah ayaa la codsadey laakiinse looma baahna.
  - b. Haddii adeeg-bixiye la aqoonsan yahay ama shatiilaha ah uu joojiyo adeegyada guriga-ka-baxsan ee macmiilka, adeeg-bixiyaha waa in uu:
    - i. Qoraal ku wargeliyaa waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee macmiilka, DDA, iyo iskuulka macmiilka ugu yaraan 30 maalmood joojinta ka hor;
    - ii. Bixi mid ka mid ah sababahan joojinta ee soo socda:
      1. Adeeg bixiyaha uusan dabooli karin baahiyada macmiilka mooyee;
      2. Bedqabka macmiilka ama bedqabka dadka kale ee guriga ama xarunta ayaa halis ku jira; ama
      3. Adeeg bixiyaha uu shaqada joojiyo mooyee; iyo
    - iii. Ka qaybgalay diyaarinta qorshe kala-guur.
  - c. Haddii macmiilka uu joojiyo adeegyada guriga-ka-baxsan ee macmiilka, DDA waxay qiimeyn doontaa caafimaadka macmiilka iyo baahiyada daryeel waxayna oggolaan doontaa adeegyada dhaca gudaha baaxadda ka-dhaafidda HCBS ama RCL.

3. In ay dad ka caawiyaan helidda adeegyada aan la halmaalin DDA oo ay ku jiraan laakiinse aan ku ekayn waxbarashada iyo daaweynta caafimaad ahaan laga maarmaan ah sida daaweynta caafimaadka habdhaqanka. Tani waxaa ka mid ah ka-qaybgalka IEP iyo kulamada kooxda qoyska iyo carruurta.
4. Adeeg-bixiyaha wuxuu ka-qaybgeli doonaa abuurista iyo hirgelinta Qorshaha Wadashaqeynta Qoyska iyo Carruurta ama Heshiiska Adeegyada Guriga-ka-baxsan (18-20).
5. Macmiilka kor ku xusan wuxuu leeyahay xuquuqahan gaarka ah ee soo socda sida looga baahan yahay xeerka goobaha HCBS kaasoo **wax looga beddeli karo hadba sidii loo baahdo** oo ah si ku saleysan kiisaska halka koritaan ahaan ay habboon tahay: [42 C.F.R. Qaybta 441.530](#) iyo [Cutubka 71A.26 RCW](#).
  - a. Shakhsi kasta wuxuu asturnaan ku haystaa qaybtiisa hurada ama fadhiga:
    - i. Qolalka jifka waxay leeyihiin albaabo ay soo xiran karaan shakhsiyaadka, iyadoo hawladeennad ku habboon oo keliya ay haystaan furayaasha ama koodhka.
    - ii. Shakhsiyaadka wadaagaya guriga waxay dooran karaan dadka ay isku qolka noqon karaan ee goobta ku sugan.
    - iii. Shakhsiyaadka waxay xor u yihiin in ay alaab dhigtaan oo ay sharaxdaan qaybaha jifka iyo fadhiga haddiiba sharraxaaddu aysan burbur u geysaneyn qaybta. Xaaladda goobaha guud ee fadhiga la wadaago, shakhsiyaadka waxaa la filayaa in ay wada-shaqeyn la yeeshaan dadka ay isku guriga yihiin. Hay'adda adeeg-bixiyaha ah waxaa ay hannaankan u fududayn doontaa sida loo baahan yahay.
  - b. Shakhsiyaadka waa in ay awoodaan in ay:
    - i. Xakameeyaan jadwalladooda iyo hawlahooda;
    - ii. Cunto helaan waqtiyada oo dhan;
    - iii. In ay dooran karaan dadka soo booqanaya waqti kasta; iyo
    - iv. In geli karaan qolkooda iyo dhammaan goobaha la wadaago ee gurigooda.

SAXIIXA ADEEG-BIXIYAHA LA AQOONSAN YAHAY AMA SHATIILAHA AH

TAARIIKHDA

TAARIIKHDA BILOWGA ADEEGYADA (LA FILAYO HADDII AADAN WELI SHAQEYNAYN)

## **Goormee foomkan la buuxin doonnaa?**

Foomkan waxaa buuxiya takhasuslaha adeegga bulshada ama maareeyaha kheyraadka kiiska waxaanna saxiixa macmiilka (haddii ay da'diisu ka weyn tahay 18), waalidka ama mas'uulka sharciga ah, iyo adeeg-bixiyaha la aqoonsan yahay ama shatiilaha ah marka ay oggoladaan adeegyada guriga-ka-baxsan iyo sida qayb ka mid ah qiimeynta sannadlaha ah. Nuqul waa in macmiilka la siiyaa (haddii ay da'diisu ka weyn tahay 18), waalidka ama mas'uulka sharciga ah, adeeg-bixiyaha la aqoonsan yahay ama shatiilaha ah, iyo takhasuslaha adeegga bulshada.

## **Intee jeer ayay tahay in foomkan la buuxiyo?**

Foomkan waa in ay sannad walba saxiixaan dhammaan dhinacyada waqtiga qiimeynta DARYEELKA cunuga ama qofka dhallinyarada ah.

## **Ka waran haddii macmiilka iyo/ama mas'uulka sharciga ah aysan oggolaan shuruudaha caddeyntan?**

Haddii macmiilka iyo/ama waalidka ama mas'uulka sharciga ah uusan oggolaan in shuruudaha caddeyntan, macmiilka ma awoodo in uu ku sugnaado meelayntiisa/teeda hadda. Shaqaalaha bulshada waa in uu la tashtaa kormeerahiisa/kormeeraheeda ee ku saabsan waxa ay noqon doonnaan tallaabooyinka xiga. Shaqaalaha bulshada waa in uu bilaabaa habraacyada xuquuqda rafcaanka iyo ogeysiiska. Haddii wax dhageysi ah aanan la soo gudbinta taariikhda dhaqangalka ee ku saabsan Ogeysiiska Tallaabbada Qorsheysan, u gudub joojinta adeegyada. Haddii rafcaanka la soo gudbiyo ee la halmaala joojintan, u gudub adeegyada joojtada ah ilaa natiijada laga go'aamiyo.

## **Waa maxay xeerarka goobaha HCBS?**

Xarumta federaalka ee Adeegyada Medicare iyo Medicaid waxay u baahan yihiin in Adeegyada Ku Saleysan Bulshada iyo Guriga in ay raacaan xeerarka qaarkood. Dowladaha gobolka waa in ay raacaan oo ay meelmariyaan xeerarkan si ay u jooqteeyan adeegyada ka-tanaasulidda/ka-dhaafidda. Xeerarkan waxaa loo yaqaanaa xeerarka Goobta HCBS.

Waxaad akhrin kartaa wax badan oo xeerarkan ku saabsan:

- [Xuquuqaha Macmiilka - RCW 71A.26.030](#)
- [Xuquuqaha Macmiilka - WAC 388-823-1095](#)
- [Goobaha Guriga iyo Bulshada Ku Saleysan - WAC 388-823-1096](#)
- [Xeerarka Goobaha Federaalka - 42 CFR 441.301](#)

## **Waa maxay Goobaha Isku-dhafka ah?**

Sannadkii 2014, Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) ayaa hirgeliyay xeernidaamyadii ugu dambeeyay adeegyada guriga iyo bulshada ku saleysan (HCBS) ee bixiya shuruudo cusub si loo kor loogu qaado tayada HCBS iyo si ilaalin dheeraad ah loo siiyo dadka hela adeegyada hoos imaanaya maamullada Medicaid qaarkood. Adeegyada DDA waa in loo bixiyo hab ka dhexgeliyo bulshada shakhsiga iyo ilaa iyo heerka helidda oo la mid ah sida kuwa shakhsiyaadka aan qaadnin HCBS.

## **Waxaan qabnaa walaac ku saabsan caafimaadka ama bedqabka, sideen wax uga qaban karnaa kuwan ee ku saabsan xeerarka goobaha isku-dhafka ah?**

Haddii walaacyadu ay saameynayaan xuquuqaha macmiilka iyo wax-ka-beddelka baahiyada xeerka, sababta ayaa loo baahan yahay in lagu diiwaangeliyo Qorshaha Adeegga Shakhsiga-Xuddunta u ah (PCSP) oo qiimeynta shaqeynta iyo qorshaha taageerada hab-dhaqanka wanaagsan waa in la dhammeeyaa. Qorshahooda waa in ay:

- Aqoonsadaan oo ay qeexaan walaaca;
- Diiwaangeliyaan waxqabadyada kale ee la isku dayay si baahiyadooda loo daboolo, laakiinse kuma guulaysan;
- Si cad u diiwaangeliyaan waxqabadyada la soo-jeediyay;
- In ay yeeshaan qorshe qoraal ah oo lagu soo ururinayo xog si loo go'aamiyo haddii waxqabadyada cusub lagu guulaystay;
- Kuddaraan inta jeer ee ay kooxdu kulmi doonto si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan xogta una go'aamiyaan haddii waxqabadyada ay lagama maarmaan yihiin;
- In ay kuddaraan heshiiska qoraalka ah ee macmiilka (haddii uu 18 ka weyn yahay) iyo waalidka ama mas'uulka sharciga ah.